



Xaqa Aad U Leedahay In Aad Su'aalo Ka Weydiin Karto Codsigaaga

Miiska ku jira

Goorma ayaa la qaataa racfaan	1
Sidee loo diiwaangeliyaa racfaanka	2
Xaq waxa aad u leedahay wakiil	2
Dib u tixgelin	2
Dhageysiga	2
Gudiga Racfaanka ee Dib u Eegista	3
Maxkamadda Dawladda Dhexe	3
La Xiriirka Lambarka Bulshada	4

Lambarka Bulshada waxa ay doonayaan in ay xaqiijiyaan in aad hesho macaashka Lambarka Bulshada ee aad xaqa u leedahay. Waxa aan fiirinaa dhamaan waxyaabaha xaqiiqada ka hor inta aynaan gaarin ka go'aan in aad xaqa u leedahay macaashka aad heli akrto. Haddii aad nagu diidam tahay go'aank aan ka gaarno codsigaaga, waxa aad ka qaadan kartaa racfaan. Waxa ay taasi ka dhigan tahay in aad na weydiisan karto in aan dacwadaada dib u eegno. Marka aad racfaan ka qaadato, waxaan dib u eegeynaa go'aanka oo dhan ma aha qodobada aad nagu diidan tahay kaliya. Haddii uu go'ankayagu qaldan yahay, waan ka bedeleynaa.

Waxaa jira afar heer oo kala sareeya ee racfaanka. Haddii aadan ku qancin go'aanka uu gaaro heer ka mid ah heerarka, waxa aad racfaan u qaadan kartaa heerka ku xiga.

Heerarku waxa ay kala yihiin:

- Dib u tixgelin;
- Dhageysi;
- Gudiga Racfaanka ee Dib u eegista; iyo
- Maxkamadda Dawladda Dhexe

Goorma ayaa la qaataa racfaan

Si aad racfaan u diiwan geliso, waxaa muhim ah in aad fahamto inta ay ku eg tahay mudada aad heysato. 60 maalmood gudahood ayaad kaga qaadan kartaa racfaan taasoo ka bilaabata

marka ay ku soo gaarto warqadda aan kuugu sheegeyno go'aanka aan gaarnay. Waxaan qiyaaseynaa in warqaddu ku soo gaartay shan cisho ka dib taariikhda ku qoran warqadda, haddii aadan na tusi karin in aad ka dib heshay.

Haddii aadan racfaan kaga qaadan 60 gudahood, waxa aad waayeysaa xaqa aad u leedahay in aad racfaan ku qaadata go'aanka aan gaarneyna waxa uu noqonayaa kama dambeys. Tusaale ahaan, Haddii aadan weydiisan in aad dib u tixgelino go'aanka an gaarnay 60 cisho gudahood, waxa aad waayeysaa xaqa aad u leedahay in dacwadda dib loogu eego.

Haddii ay jirto sabab macquul ah oo aadan racfaan u qaadadan mudadii racfaanka, waxaa suuro gal ah in lagu siiyo waqti dheeraad ah. Waa in aad qoraal ku codsataa waqti dheeraad ah, adiga oo ku cadeynaya sababta daahitaanka keentay.

Haddii mudadu ku dhamaaneyso Sabti, Axad ama maalin ciid qaran ah, waqtigu wuxuu ku eg yahay maalinta shaqada ee ku xigta.

Sidee loo diiwaangeliyaa racfaanka

Waxaa waajib kugu ah in aad racfaanka qoraal ku soo gudbiso. Waad na soo wici kartaa oo aad na wweydiin kartaa foomka racfaanka ama aad noo soo diri kartaa codsi aad saxiixday oo ku qoran yahay Lambarkaaga Bulshada oo aad ku cadeyneyso in aad dooneyso in aad racfaan ka qaadata go'aankii aan gaarnay. Haddii aad codsatay macaashka Lambarka Bulshada codsigaagana la diiday, sida ugu fudud uguna dhaqsaha badan waa adiga oo racfaankaaga ku soo gudbiya www.socialsecurity.gov/disability/appeal. qoraalka taageeraya racfaankaaga waad ku soo gudbin kartaa inetnetka kaasoo naga caawinaya in ay yareyso waqtiga go'aan gaarista ee Lambarka Bulshada.

Haddii aad ku nooshahay meel ka baxsan Mareykanka, waxa aad racfankaaga ku soo gudbin kartaa barta internetka.

Xaq waxa aad u leedahay wakiil

Waxa aad dooran kartaa in qof uu kaa caawiyo racfaanka ama wakiil kaa noqdo. Qofkaas waxa uu noqon karaa qareen ama qof kale oo aad garaneyso oo aqoon u leh nidaamka Lambarka Bulshada. Waxa aan la shaqeyneynaa wakiilkaaga sida aan adiga kuula shaqeyn laheyn. Wakiilkaaga ayaa mas'uul kaaga noqonaya inta badan arrimaha la xiriira Lambarka Bulshada waxaana loo dirayaa nuqul ka mid ah go'aan kasta oo laga gaaro codsigaaga.

Wakiilkaaga lacag kaama qaadan karo adiga oo aan ogolaasho qoraal ogolaasho ah ka helin Lambarka Bulshada. Haddii aad dooneyso macluumaad dheeraad oo ku saabsan sameysashada wakiil, akhri *Your Right To Representation* (Daabacaadda 05-10075), kaasoo aad ka heli karto barta internetka ee, www.socialsecurity.gov.

Dib u tixgelin

Dib u eegista waa iyada oo si buuxda uu ugu noqdo codsigaaga qof ka tirsan Lambarka Bulshada (ama Adeegga Caddeynta Naafanimada haddii aad racfaan ka qaadaneyso go'aan ku saabsan naafanimada) oo aan ka qeyb qaadan go'aan gaaristii hore. Qofkaas waxa uu eegayaa dhamaan caddeymaha la adeegsaday si loo gaaro go'aankii hore, iyo caddeymaha cusub.

Marka aan go'aan ka gaarno codsigaaga, waxaan kuu soo direynaa waraaq aan kuugu sheegeyno go'aankayaga.

Dhageysiga

Haddii aadan ku raacsneyn go'aanka dib u eeegidda, waxa aad weydiisan kartaa dhageysi. Dhageysiga waxaa qabanay qaali xagga maamulka ah oo aan ka qeyb qaadan go'aankii gugu horeeyey ama go'aanka dib ugu noqoshada.

Dhageysiga waxaa inta badan ugu qabtaa meel aan hoygaaga ka fogeyn 75 meyl. qaaliga xagga maamulka ah waxa uu ku soo wargelinayaa xilliga iyo goobta lagu qabanayo dhageysiga.

Inta aan la qaban dhageysiga, waxa laga yaabaa in lagu weydiisto in aad na siiso cadeymo iyo macluumaad dheeraad ah oo taageeraya codsigaaga. Waxa aad arki kartaa macluumaadka ku jira galkaaga kuwo cusubna waad na siin kartaa.

Dhageysiga, qaaliga xagga maamulka waxa uu ku weydiin doonaa su'aalo markhaatiyaal dhinacaaga ahna waad keeni kartaa. haddii kale, khubarada caafimaadka iyo xirfadaha, adiga oo sidoo kale macluumaad dheeraad keenimkara dhageysiga. Adiga iyo wakiilkaaga waxa ay su'aalo weydiin karaan markhaatiyaasha.

Xaaladaha qaarkood, waxaa dhageysiga lagu in fiidoow la isku arko halkii aad qof ahaan tagi laheyd. Inta aan la gaarin ka hor ayaan kula socodsiineynaa haddii ay sidaas tahay. Dhageysiga fiidoowga, waxa aan dhageysiga ka dhigi karnaa mid aadan dhib kala kulmin. Balanta dhageysiga fiidoowga way ka dhaqso badan tahay marka aad shaqsi ahaan ka qeyb galeyso dhageysiga. Sidoo kale, goobta ka qeyb qaadshada dhageysiga ee fiidoowga waxaa laga yaabaa in ay u dhawaato hoygaaga. Taas waxaa laga yaabaa in ay markhaatiyaashaada iyo dadka kale u fudueyso in ay ku soo raacaan.

Inta badan adiga ayey dan kuugu jirtaa in aad ka qeyb qaadato dhageysiga (qof ahaan ama fiidoowga). Adiga iyo wakiilkaaga, haddii aad leedahay, ayaa imanaya dhageysiga oo sharxaya codsigaaga.

Haddii aadan ka qeyb gali karin dhageysiga ama aadan dooneyso in aadan ka qeyb galin, waa in aad noo sheegtaa si qoraal ah sida ugu dhaqsaha badan. Haddii uusan qaaliga xagga maamulka aaminsan yahay in ka qeybgalkaagu muhim u yahay go'aanka uu gaarayo, wajib kuguma aha in aad ka qeyb qaadato. Ama haddii siyaabo kale ayaan kuula shaqeyneynaa,

sida inaga o bedelna waqtiga ama goobta dhageysiga lagu qabanayo. Waa in ay jirtaa sabab la taaban karo oo aan waqtiga ama goobta aan u bedelno.

Dhageysiga ka dib, qaaliga ayaa gaaraya go'aan ku sleysan dhaman macluumaadka codsiga, oo ay ka mid yihiin macluumaadka cusub ee aad na siisay. Waxaan kuu soo direynaa waraaq and nuqul ka mid ah go'aanka qaaliga.

Gudiga Racfaanka ee Dib u Eegista

Haddii aad nagu diidan tahay go'aanka ka soo baxay dhageysiga, waxa aad weydiisan kartaa in Gudiga Racfaanka ee Lambarka Bulshada dib u eegaan. Gudiga Racfaanka waxa uu dib u eegaa dhamaan codsiyada, laakiin waa la diidi karaa haddii ay aaminsan yihiin in go'aanka dhageysiga uu sax yahay. Haddii Gudiga Racfaanka ay go'aan ku gaaraan in ay dib u eegaan codsigaaga, iyaga ayaa go'aan ka gaaraya ama dib ugu celinaya qaaliga maamulka si uu dib ugu eego.

Haddii Gudiga Racfaanka diido inuu dib u eego codsiga, waxaanu kuu soo direynaa waraaq aan kuugu sharxeyno diidmada. Haddii Gudiga Racfaanka dib u eego codsigaaga oo gudigu go'aan ka gaaro, waxaan kuu soo direynaa waraaq ku saabsan go'aanka. Haddii Gudiga Racfaanka uu dib ugu celiyo dacwada qaaliga maamulka, waxaan kuu soo direynaa iyo nuqul ka mid ah amarka.

Maxkamadda Dawladda Dhexe

Haddii aadan ku raacsaneyn go'aanka Gudiga Racfaanka ama uu gudigu go'aan ku gaaro in aanu dib u eegin, waxa aad dacwad ka diiwaan gelin kartaa maxkamadda dawladda dhexe. Warqadda aan kuu sheegeyno go'aanka gudiga ayaa lagu faahfaahinayaa sida maxkamadda loo weydiisto in ay fiiriso dacwadaada.

La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira noloshu.

Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda www.socialsecurity.gov. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my Social Security* xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement (Warbixinta Lambarka Bulshada)*, ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada lagu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka

caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tiihin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.



Securing today
and tomorrow

Social Security Administration
Publication No. 05-10058-SO | July 2017 (March 2015 edition may be used)
Xaqaa Aad U Leedahay In Aad Su'aalo Ka Weydiin Karto Codsigaaga
Your Right To Question The Decision Made On Your Claim (Somali)
Produced and published at U.S. taxpayer expense
Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyaasha